



# DOORASHADA ISKOOOLKA

2023-2024 Majalada Dhijitaalka ah





# JADWALKA BUUGA

East Upper School.....3

Edison Career & Tech High School.....4

Franklin Upper School.....5

James Monroe Upper School.....6

Joseph C. Wilson Magnet High School.....7

Northeast College Prep High School.....8

Rochester Early College International High School (RECIHS).....9

School of the Arts (SOTA).....10

School Without Walls.....11





# EAST

## EAST UPPER SCHOOL



Hadafka Dugsiga Sare ee East waa inoo ardayda u suurto galiyo inee mustaqbalkooda mas'uul ka noqdaan ayagoo adkeesi leh, u fakiraayo si ujeedo leh, una doodaayo naftoota iyo dadka kale. East waxaa ka go'an inee bixiso jawi waxbarasho oo adag iyadoo siineeso maalin iskooleed oo dheer ah, barashada luqad ajnabi, barnaamij labo luqadood ah, iyo koorsooyin heer sare. Hababka xalinta khilaafaadka waxaa loo adeegsadaa in lagu hormariyo nolasha oo dhan, nabad ku xalin mushkilad, iyo labo qof oo waaweyn maalin kasto 30-daqiiqo "koox qoyseed" waxee isku xiraan koox yar oo arday ah see u kobciyaan xiriirka iyo kor ugu qaadaan midnimo iyo nidaamka taageerada dabiiciga ah.

Xarunta Taageerada Ardayga waxay bixisaa isku xirka ururada ku salaysan bulshada, iyo Iskaashiga Waxbarasho ee Jaamacada Rochester waxee kor u qaadaa dhamaan qaybaha iskoolka, oo ay ku jiraan Daaweenta Caafimaad ee Xarunta Jaamacada Rochester oo bixiso adeegyo bilaash ah arday kasto ee East. East waxee heestaa ciyaaro doorasho badan udhaxeeso iskoolada, iyo waxee bixisaa fasalo Waxbarasho Darawal.

**Address:** 1801 East Main Street, 14609  
**Phone:** 585-288-3130  
**Website:** [www.rcsdk12.org/east](http://www.rcsdk12.org/east)  
**Email:** [eastupperinfo@rcsdk12.org](mailto:eastupperinfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 9-12



## WAXYAABO WAAWEYNAA MEESHAAN KA DHACOOYO

*Taageero Waxbarasho oo Xoog leh | Koox Qoys | Dariiqooyin Xirfado*

East, ardayda waxay ka qaybqaadan karaan noocyo kala duwan [barnaamijyo xoogsan oo xirfadeed](#) loogu talagalay baahiyaasha shaqaalaha qaranka iyo kuwa maxaliga ah, lagu abuuray talooyinka jaamacada iyo lahawlgalayaasha warshadaha ayagoo diirada saaraayo u diyaarinta ardayda guusha ka dembeeso qalinjabinta dugsiga sare. U gaar ah East, ardayda waxee baran karaan Cunto Karis, Daryeelka Indhaha, Macluumaadka Teknoolojiyada, Caafimaad, Caafimaadka Sayniska iyo Shaybaarka, Waxbarista iyo Barashada, iyo Ganacsi. Dqiiqooyinka kale waxaa ka mid ah Amaanka Dadweynaha, Sayniska Dabka, iyo Cadaalada Dambiyada.

## WAXAA NAHAY WAX KABADAN TACLIIN





# EDISON CAREER & TECHNOLOGY HIGH SCHOOL



Dugsiga sare ee Edison Career iyo Technology waxoo bixiyaa wax ka badan waxbarashada dugsiga sare. Waxoo leeyahay taariikh qani ah oo Xirfad iyo Waxbarasho Farsamo (CTE), ama Waxbarasho Muhiim ah iyo Waqtiyeesan, sidoo iskoolka jecelyahay inoo ugu waco. Edison, ardayda waxee fursad u heestaan inee mustaqbalkooda abuurtaan iyo aasaaska loo baahan yahay see u dhacdo. Xarunta cusub ee la dayactiray waxoo bixiyaa meelo waxbarasho oo casri ah (CET), maktabad cusub, iyo meel lagu wada shaqeeyo.

Edison woo ka badan yahay tacliin. Marka lagu daro bixinta koorsooyinka AP iyo barashada luqada ajnabiga, ardayda waxee ka qeyb qaadan karaan tababar farsamo iyo waxbarasho ku saleysan shaqo. Dariiqadaha CTE waxee ku xiraan fasalada dugsiga sare waxbarasho farsamo, latalin, shaqo daawasho, iyo tababaro MUSAAR leh sidee ugu caawiyaan ardayda inee hore u socdaan. Waxaa kasban kartaa aqoonsiyada warshadaha iyo dhibco jaamacad, marka lagu daro ka qeybqaadashada kooxaha, ciyaaraha, iyo hawlo kale oo ka baxsan manhajka. Isku soo wada duub, waxaa helee waayo aragnimo waxbarasho oo hal nooc ah!

**Address:** 655 Colfax Street, 14606  
**Phone:** 585-324-9700  
**Website:** [www.rcsdk12.org/edison](http://www.rcsdk12.org/edison)  
**Email:** [edisoninfo@rcsdk12.org](mailto:edisoninfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 9-12



## ABUUR MUSTAQBALKAAGA

*Hagaamiyaha Xirfada iyo Diyaarinta Jaamacada | Shaqo Daawasho iyo Tababaro | Iskaashi Ganacsi Xoogan*

Edison, ardayda waxee raacaan mid ka mid ah afar dariiqado oo kala duwan oo xirfadeed, meeshaas ee ka helaan tababar gacmeed iyo waayo aragnimo shaqo oo ku xiran barashadooda fasalka, taas oo ka dhigeeso fasalo muhiim ah iyo xiiso leh. Dariiqad kasto waxaa loogu talagalay in lagu diyaariyo ardayda see ugu dhaqaaqaan xirfadaha baahida loo qabo ama jaamacada ka dib qalinjabinta.

Fiiri [fiidiyowgooda](#) iyo isdhaxgalka [websitekooda inta](#).

## RAADI MUSTAQBALKAAGA





# FRANKLIN UPPER SCHOOL



Franklin waxoo qayb ka ahaa taariikhda Rochester in ka badan 100 sano. Iyadoo la kaashaneeso qoyska, iskoolka, iyo bulshada, Franklin waxaa ka go'an inee dhamaan ardayda si cadaalad ah u helaan waxbarasho tayo sare leh iyo ardayda ka qalinjabiso oo u diyaarsan inee noqdaan xubno bulshada ka mid ah oo wax soo saar leh. Franklin waxaa ka go'an inee taageerto dhaqamada iyo luqadaha kala duwan, ka qeyb qaadashada qoto dheer ee ardayga, iyo raadinta waxbarashada nolosha oo dhan.

Ugaar ah Franklin waa F.U.N. Waqtiga Ikhtiraaca Iskoolka Ka Bacdi ee fasalada Franklin Sare Sagaalaad iyo tobanaad. Inta lagu jiro barnaamijkaan iskoolka ka bacdi, ardayda waxee ka shaqeeyaan mashruucyo xiiso leh, waxee ku hawlan yihiin raadis shaqo iyo jaamacad, iyo inee qabtaan hawlo si toos ah ugu caawin doona waxbarashadooda. Hadafka waa in kor loo qaado waxbarashada ardayga si xiiso leh, waxqabadyo gacmeed iyo in la siiyo hagitaan shaqada guriga si loogu caawiyo ardayda xirfadaha iyo dhibcaha ee u baahan yihiin see u helaan wado ee ku guuleestaan.

**Address:** 950 Norton Street, 14621  
**Phone:** 585-467-3131  
**Website:** [www.rcsdk12.org/franklin](http://www.rcsdk12.org/franklin)  
**Email:** [franklinupperinfo@rcsdk12.org](mailto:franklinupperinfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 9-12



## KU DHISAN SHARAF IYO HEER SARE

*Ka Qeybgalka Ardayga | Xiriir Wanaagsan | Taariikh Qarni ah*

Firfircooni, wanaag, iyo xiriir dhaqan muhiim ah ayaa lagu kobciyaa jawiga waxbarashada meeshaas oo tacliinta, taageerida dareenka bulshada, iyo cadaalada ay kor u qaado guul iyo kor u qaado xirfadaha nolosha si loo helo dariiqad lagu gaaro guul ka dib dugsi sare. Waxaa intaas dheer bixiyaasha koorsada AP, barashada luuqada ajnabiga, iyo barnaamijka Seal of Biliteracy, ardayda waxee sidoo kale ka qayb qaadan karaan ciyaaraha, dowlada ardayda, kooxda guriga cagaarka, kooxda banaanka, kooxda SEAM, kooxda aqriska, iyo kuwo kale oo badan.

## XIKMAD WAXEE IFTIIMISAA JIDKEENA





# JAMES MONROE UPPER SCHOOL



Dugsiga Sare ee James Monroe waa Jawharka Magaalada sababtoo ah ardayda Monroe waxee u iftiimaan dhalaal! Monroe waxee siiyaa fursad waxbarasho aad u fiican oo jawi amaan ah. Kambaska la dayactiray waxoo bixiyaa xarumo casri ah, meeshaas oo shaqaalaha, ardayda, iyo qoysaska si wadajir ah ugu shaqeeyaan see u abuuraan bulsho waxbarasho oo kobciso ixtiraam iyo daryeel midba midka kale. Monroe waxoo bixiyaa barnaamijyo tacliin oo xoog leh, kooxaha horyaalka ciyaaraha ee wiilasha iyo gabdhaha, iyo khibrado dhaqameed oo gaar ah.

Intaas waxaa sii dheer, ardayda Monroe waxee fursad u leeyihiin inee helaan NYS Seal of Biliteracy, taas oo tilmaameeso aqoon heer sare oo ka badan hal luqad. Dariiqadaan waxoo kor u qaadaa labo luqadood iyo kartida aqriska, qorista, dhageysiga, iyo ku hadalka af-isbaanish iyo ingiriis labadaba. Ardayda helo Seal of Biliteracy waxee leeyihiin faa'iido kala duwan markee jaamacada buuxinaayaan.

Monroe waa Iskool Bulsho leh ee iskaashi waxbarasho keeno, adeegyada dareenka bulshada, horamarka dhalinyarada, iyo ka qaybgalka bulshada hal saqaf hoostiisa. Monroe waxoo siiyaa ardayda taageero waxter leh, dareenka bulshada asagoo yareenaayo dhuminta waqtiga waxbarashada iyo bixinaayo taageero waxbarasho oo shaqsiyeed. Qaabkaan gaarka ah waxoo horseedaa hormar tacliin, qoysas xoog leh, iyo bulshooyin caafimaad qabo.

**Address:** 164 Alexander Street, 14607  
**Phone:** 585-232-1530  
**Website:** [www.rcsdk12.org/monroe](http://www.rcsdk12.org/monroe)  
**Email:** [monroeupperinfo@rcsdk12.org](mailto:monroeupperinfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 9-12



## JAWHARKA MAGAALADA

*Ahmiyada Qorista Laba Luqadood | Dugsiga Bulshada | Ardayda Madaxda*

Barnaamijka Monroe SMART (Taqasuska Isboortiska, Ciyaaraha, iyo Raadraaca Regents-ka) waa dariiqad u gaar ah oo loogu talagalay in lagu caawiyo ardayda inee gaaraan Dibloomada NYS Regents-ka ayagoo la kulmaayo hagitaanka NCAA iyo diyaarinta fursado la xiriiro isboortiska ee ka baxsan waxee ciyaaraan. Barnaamijkan waxbarasho ee halka nooc ah waxoo bixiyaa doorashada dhowr fasalo oo gaar ah, sida Hormarinta Qaadista Miisaanka, Mechatronics, iyo Jawaabista Xaaladaha Degdega ah, taas oo ugu dambeeskii ardayda helaan shahaadada Caawimaada Koowaad iyo CPR iyo dhibco Jaamacadeed.

## BULSHADEENA MAANTA, CAALAMKA BARI






# JOSEPH C. WILSON MAGNET HIGH SCHOOL COMMENCEMENT ACADEMY



Ardayda rabaan inee u tartamaan aqoon waa inee tixgeliyaan Dugsiga Sare ee Joseph C. Wilson Magnet. Barnaamijka Shahaadada Caalamiga ah (IB) waxoo dhiirigeliyaa falanqeen muhiim ah, xirfado cilmi baaris, iyo adeeg qayb ka ah habka waxbarasho, oo leh manhaj iyo qiimeenyo joogto ah oo ka mid ah 4,000 IB iskoolal ee aduunka oo dhan. Barnaamijka kaliya IB ee RCSD, Wilson waxoo u diyaariyaa ardayda qalinjabisay see ugu guulaystaan dhaqaalaha aduunka si cajiib ah, aqoonyahan, iyo daryeelo dhalinyarada. Ardayda dhameesto barnaamijka IB ee qaadato shahaadada waxaa lagu dhiirigeliyaa inee buuxiyaan Jaamacada Rochester, sida buuxiyaasha la aqbalo waxaa lagu abaalmariyaa deeq waxbarasho oo buuxdo, afar sano.

Wilson waxoo isku dheelitiraa barnaamij tacliin adag iyo dariiqado shaqo oo kala duwan oo leh farshaxan balaaran, muusig, ciyaaro, iyo bixitaan hawlo ka baxsan manhajka. Ardayda dadaalka badan, dhiiran, edebta leh, iyo ka go'an inee guuleystaan, wax kusoo biiriyo xubnaha bulshada waxee hoy ka heli doonaan Wilson.

**Address:** 501 Genesee Street, 14611  
**Phone:** 585-328-3440  
**Website:** [www.rcsdk12.org/wilson](http://www.rcsdk12.org/wilson)  
**Email:** [wilsoninfo@rcsdk12.org](mailto:wilsoninfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 9-12



## SHAHAADO CAALAMI AH SOO U HAGO GUUSHA ARDAYGA

*Maskax Caalami ah | Wadooyin Qalinjabin Badan | Waxbarasho Adag*

Marka lagu daro IB, Wilson waxoo bixiyaa waxbarasho luqado ajnabi oo heer sare ah iyo koorsooyin badan oo AP ah. Iskoolka waxoo leeyahay barnaamijka AVID (Hormarka iyadoo loo maraayo Go'aan Shaqsiyeed), kaas oo loogu talagalay in lagu caawiyo ardayda aan si fiican sameenin oo leh karti waxbarasho sare in loogu diyaariyo jaamacad iyo shaqo. Barnaamijka waxaa lagu bixiyaa labada doorashada fasal dhibco leh iyo mid iskoolka dhan AVID oo diirada saaraayo isticmaalka xeeladaha iyo dhaqamada lagu caawiyohormarka ardayga. Wilson waxoo sidoo kale bixiyaa fasalo laba luuqadood ah iyotaageero balaaran oo ku saabsan adeegyada waxbarashada qaaska ah, oo ka mid ah barnaamijka Cudurka Autism.

## FALANQEEEN, CILMI BAARIS, ADEEG, KORITAAN





# NORTHEAST COLLEGE PREPARATORY HIGH SCHOOL



Dugsiga Sare ee Northeast Collage Preparatory waxaa ka go'an inoo bixiyo waxbarasho dhameystiran asagoo kor u qaadaayo codka ardayga si kor loogu qaado jawaabta manhajka dhaqan ahaan kaas oo kobcinaayo nolosha bartayaasha oo dhan, udoodayaasha, iyo hogaamiyaasha. Ardayda waxaa la siiyaa fursad ay ku hogaamiyaan iyagoo falanqaynaayo bulshada iskoolka, ogaanaayo dhibaatooyinka iyo baahida, sameenaayo cilmi baaris, iyo u soo bandhigaayo xalalka suurtagalka ah maamulka iyo hogaamiyaasha macalimiinta iyada oo loo maraayo Gudiga Codka Ardayda. Northeast waxoo sameeyaa tusaale iskool meeshaas oo codka ardayga muhiim yahay oona saameeyo waxee sameeyaan, laguna daray manhajka MIKVA, barashada dareenka bulshada, dhisida xiriirka latalinta, iyo fayobida ardayga iyo hormarmarinta ilaa Tacliinta Fasalka Sagaalaad.

Kambaska waxoo heestaa xarun caafimaad ee Rochest Regional oo si buuxdo u shaqeeso, taas oo bixiso adeegyo kala duwan, oo ay kamid tahay baarista jirka, talaalada, qaabilaada socod iyo balamo la qorsheeyay, daawooyin, iyo latalin. Xafiiska Xiriirka Qoyska iyo Bulshada waxoo bixiyaa adeegyo lagu caawiyo in laga saaro caqabadaha ardayda iyo qoysaska see u kobcaan, adeegyada waxaa ka mid ah maqasiin cunto, armaajo dhar, helitaanka hay'adaha, iyo caawimaad ka imaado Kalkaalayaha iskoolka ee guriga iyo taqasusaha taageerida imaanshaha. Northeast sidoo kale waxoo leeyahay in ka badan 15 la hawlgalyaal hay'ado, kuwaas oo qalab u ah hagida, kobcinta, iyo ka qaybgalka bulshada.

**Address:** 4115 Lake Avenue, 14612  
**Phone:** 585-324-9273  
**Website:** [www.rcsdk12.org/ne](http://www.rcsdk12.org/ne)  
**Email:** [neinfo@rcsdk12.org](mailto:neinfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 9-12



## AWOODSIINTA ARDAYDA INEE ISTICMAALAN CODKOODA

Sharaf Shabeel | Iskool Bulsho | Cadaalad Bulsho

Ardayda waxee qaadan karaan maadooyinka AP iyo koorsooyin Jaamacada Monroe Community, taas oo u ogolaaneeso inee helaan dhibco jaamacadeed dugsiga sare. Marka lagu daro tacliinta, Northeast waxay bixisaa koorsooyin noocyo kala duwan ah ee farshaxan iyo muusig, ciyaaro, iyo hawlo kabaxsan manhajka. Dhamaan ardayda waxaa loo tababaray hormarin hogaamin iyadoo loo maraayo JROTC, iyo ardayda fasalada 9aad waxee bartaan waxee qaadaneeso in la guuleysto iyagoo qaadanaayo fasalk Seminaar Sagaalaadka. Bulshada, dareenka, iyo caafimaadka maskaxda waa muhiim, iyo kobcin dheeraad ah iyo ka qeybgalka ayaa mudnaan la siiyaa iskoolka sabtida, iskoolka habeenkii, iyo machadyada marka fasaxa, kuwaas oo la bixiyo sanadka oo dhan.

## WADOOYIN BADAN LOO MARO DHAMAADKA QADKA!







# ROCHESTER EARLY COLLEGE INTERNATIONAL HIGH SCHOOL



Ardayda rabaan inee aadaan jaamacad ayagoo dugsiga sare – hafiirinin wax dheeraad ah! Dugsiga sare kaliya ee RCSD bixiyo moodeelka bilaawida Jaamacada waqti hore, Rochester Early College waxoo bixiyaa fursad ee ardayda ku kasban karaan dibloomada Regents-ka iyo 24- 60 dhibco jaamacad ah afar sano dhaxdooda. Ardayda leh anshax shaqo oo xoogan kuwaas oo si heer sare ah ku dhiirsan inee hormaraan bilowga shahaadada jaamacada laba ama afar sano waa inee tixgeliyaan Dugsiga Sare ee Rochester Early College International. Iyadoo loo maraayo wadashaqeyn dhow ay la leedahay Monroe Community College, ardayda waxay helaan dareen shaqsiyeed ee deegaan iskool yar.

Kala duwanaanshaha dhinac kasto ayaa lagu dabaaldagaa laguna ixtiraamaa Rochester Early College. Ardayda waxee wax ka qabtaan caqabadaha waxbarasho ee adag waxayna soo dhaweeyaan dhamaan kala duwanaanshaha shaqsiyeed maalin kasto. Marka lagu daro tacliinta, Rochester Early College waxoo bixiyaa howlo ka baxsan manhajka oo noocyo kala duwan ah, oo ay ku jiraan ciyaaraha, Ardayda Dowlada, iyo JROTC.

**Address:** 200 Genesee Street, 14611  
**Phone:** 585-324-9010  
**Website:** [www.rcsdk12.org/recihs](http://www.rcsdk12.org/recihs)  
**Email:** [recihsinfo@rcsdk12.org](mailto:recihsinfo@rcsdk12.org)

## AWOODA KAQALINJABINTA CAALAMI AH, ARDAY U DIYAAR AH JAAMACAD

*Halabuur | Tacliin Adag | Iskool Deegaan Yar*

Arday kasto waxaa laga filaa inoo qaato koorso buuxdo inta lagu jiro dhamaan afarta sano, ha ahaato dugsiga sare ama xarunta MCC. Koorsooyinka Laba-dhibcoodka leh dhibcooyin jaamacad, kaas oo ka bilaawanaayo fasalka 9aad waxaa lagu bixiyaa qeebta Farshaxanka, Caafimaadka, Xafiiska Microsoft, Maareenta Lacagta shaqsi ahaaneed, Ingiriisi, Spanish, Chinese, iyo Hordhac Ganacsi ah. Ardayda fasalada 11 iyo 12 waxee ka qaadan doonaan fasalo xarunta MCC lacag la'aan. Iskoolka waxoo bixiyaa nidaam taageero oo xoog leh oo lagu caawiyo ardayda inee guuleestaan.

## JAAMACADA MAANTEE BILOWANOOSAA





# SCHOOL OF THE ARTS



Ardayda rabto guul tacliin sare oo rabto inee horumariyaan hibadooda farshaxanka waa inee soo buuxiyaan School of the Arts (SOTA). Ardayda SOTA waxee qaataan koorso tacliin oo dhameystiran marka lagu daro taxane adag ee Fanka mid ka mid ah lix maado - Qorista Hal Abuur, Ciyaar, Riwaayad, Muusig (Qalab iyo Cod), Teknolojiyada Tiyaatarka, iyo Farshaxanka Muuqaalka ah. semester kasto, ardayda waxaa looga baahan yahay inee ka qaybqaataan bandhigyo, afkaar, riwaayado, aqris, iyo bandhigyo ku dhax jiro qeebta ugu waaweyn ee daraasadooda. Maadaama jadwalka bandhigyada fanka balaaran, ardayda SOTA waxee ku dadaalaayaan barasho ka baxsan maalinta iskoolka.

Aqbalitaanka School of the Arts waxoo ku saleesanyahay hab dhageysi rasmi ah. Ardayda waxaa loo qaban doonaa balan lagu dhageysto markee soo dhameystiraan soo buuxinta SOTA. **Waqtiga kama dambayska ah ee la soo buuxin karo waa Deseembar 16, 2022.** Dhageysiga waxoo dhici doonaa asbuuca ugu dambeeyo ee Janaayo. Fadlan booqo [www.sotarochester.org](http://www.sotarochester.org) saa u heshid macluumaad dheeraad ah, oo ku jiro soo buuxinta.

**Address:** 45 Prince Street, 14607  
**Phone:** 585-242-7682  
**Website:** [www.rcsdk12.org/sota](http://www.rcsdk12.org/sota)  
**Email:** [sotainfo@rcsdk12.org](mailto:sotainfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 7-12




## TACLIIN LAGU DHAMEESTIRAY MANHAJ FARSHAXAN KU SALEESAN

*Tacliin Xaagan | Hibada Fanka | Xaafada Fanka*

SOTA Waxoo bixiyaa tacliin dhaqameed oo lagu dhameestiray manhaj faneed, oo leh falsafad waxbarasho oo isku milmiso korontada hal abuurka fanka iyo tababar waxbarasho oo tacliin ah. Barnaamijyada tacliinta iyo farshaxanka ayaa la xoojiyay iyadoo loo maraayo ururka iskoolka ee la hawlgalayaasha bulshada, oo ay ku jiraan Iskoolka Hochstein, Iskoolka Muusiga ee Eastman, Memorial Art Gallery, iyo Matxafka Rochester iyo Xarunta Sayniska. Marka lagu daro fasalada tacliinta AP iyo farshaxanka, ardayda SOTA waxee sidoo kale fursad u heestaan inee ka qayb galaan ciyaaraha, kooxaha, iyo munaasabadaha bandhigyada sanad dugsiyeedkii oo dhan.

## KA DHIG DARBAALKAAGA MID NOOL





# SCHOOL WITHOUT WALLS




Dugsiga Without Walls waa mid ka mid ah dugsiyada sare ee ugu da'da weyn ee aan caadiga ahayn ee qaranka iyo qayb ka mid ah Bandhiga Heerka Isbadelka NY. Waa bulsho wax baraneeso oo midba midka kale ku heeso habdhaqan heersare ah, dhaqan iskool, iyo tacliin. Ardayda waxaa laga filaa inee si heer sareeso ah sameeyaan tacliinta adag iyo inee dhameestiraan qiimayn ku saleysan waxqabadkooda. Iskooka Without Walls waxoo xooga saaraa fikirada muhiimka ah iyo muwaadinimada mas'uulinimada, oo leh falsafad ku saleysan maadooyinka bartayaasha. Ardayda waxaa la siiyaa fursado ay kaga qayb qaataan maamulka iskoolka, go'aan gaarista iyo xalinta dhibaatooyinka.

Kambaska waxaa lagu sameeyay dayactir, oo ay ku jiraan dhismaha qolka jimicsiga iyo qolka jirdhiska iyo casriyeen fasalada sayniska iyo farshaxanka. School Without Walls maka qeybqaato barnaamijka NCAA , sidaas darteed ardayda filayo deeqda ciyaaraha Qaybta I ama II waa inee ka fakiraan ka hor intee soo buuxinin.

Aqbalitaanka Iskoolka Without Walls waxoo ku saleysan yahay soo buuxin gooni ah taas oo loo soo diro arday kasto oo fasalka 8aad ah. Waqtiga kama dambayska ah ee soo buuxinta waa Jimcaha, Maarso 31, 2023. Fadlan wac iskoolka ama booqo boga internetka wixii macluumaad dheeraad ah.

**Address:** 480 Broadway, 14607  
**Phone:** 585-546-6732  
**Website:** [www.rcsdk12.org/sww](http://www.rcsdk12.org/sww)  
**Email:** [swwinfo@rcsdk12.org](mailto:swwinfo@rcsdk12.org)  
**Grades:** 9-12



## BULSHADA WAXBARATO EE AAN CAADIGA EHEEN

*Tacliin Adag | Adeega Bulshada | Waxqabad Ku Saleysan*

Ardayda waxee sanad kasto ka qayb qaataan adeeg bulsho oo balaaran waxayna bartaan inee ka faa'iideystaan khayraadka bulshada see kor ugu qaadaan waxbarashadooda. Fasalka taban iyo labaad waxee dhameestiraan mashruuc sanadle ah, waxay qabtaan bandhigyo dadweyne, waxayna u difaacaan shaqadooda gudiga dib u eegista ee khubarada bulshada, macalimiinta, iyo ardayda. Arday kasto waxoo leeyahay la taliye oo la heesto shirar gaar ah oo joogto ah. Ardayda ma helaan gaadiid toos ee iskoolka; taas badalkeedana waxaa la siiyaa kaar bas RTS ah oo u ogolaanaayo inee ku dhex aadaan bulshada oo dhan see u buuxiyaan shuruudahooda.

## WAXBARASHO AAN AQOONIN XUDUUD

